



Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ankara, Turkey

Xeerka Isticmaalka Adeegga Negeeye

Terms of Use

Mawaaddin ku soo dhowow Adeegga Negeeye,

Fadlan inta aadan isticmaalin Adeegga Negeeye akhri xeerkan.

1. Adeegga Negeeye waa adeeg u gaar ah, oo ay leedahay Safaaradda Soomaaliya ee Ankara, Turkey. Waa xaquuq u gaar ah oo aan fasax la'aan loo isticmaali karin.
2. Adeeggan waxaa loo isticmaali karaa ujeddooyinka loogu talo galay oo keliya.
3. Adeegga Negeeye wuxuu isticmaalayaashiisa u fududaynayaa sidii ay dalabkooda u soo gaadhsiiin lahaayeen Safaaradda Soomaaliya ee Ankara, iyaga oo aan iman Safaaradda.
4. Warqad ama warbixin kasta oo isticmaaluhu ku soo diro Adeegga Negeeye, Safaaradda Soomaaliya waxay u rumaysanaysaa in ay tahay warqad ama warbixin sax ah, oo aan been abuur ahayn. Haddii ay dhacdo in isticmaaluhu warqad been-abuur ah ama warbixin khaldan ku soo diro Adeegga Negeeye, isaga ayaa ka masuul ah wixii ka yimaadda. Waxayna noqon kartaa dembi qofku ciqaab ku mutaysan karo.
5. Qofku isaga ayaa masuul buuxa ka ah, in uu soo dirsado warbixin sax ah. Saraakiisha Safaaraddu masuul kama noqon doonaan, haddii waraaqaha iyo xogta aad soo qoratay kaa khaldanyihiin.



Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ankara, Turkey

6. Isticmaaluhu isaga ayaa masuul ka ah in uu soo qorto cinwaanka ama addresska saxda ah ee uu degganyahay. Safaaraddu waxay warqadahaaga ku soo diraysaa cinwaanka aad soo gelisay **Adeegga Negeeye** oo keliya. Ma aqbali doonto cinwaan ama address aad ku soo gudbisey WhatsApp, email ama telefoon.
7. Khidmadda adeegyada safaaraddu ku gudbiso Adeegga Negeeye, waxaa lagu bixin karaa oo keliya xisaabaha bangiyada ee Safaaradda. Faahfaahinta xisaabaha Safaaradda, waxaa qofkii adeegga soo dalbada loogu soo diri doonaa isla Adeegga Negeeye. Si kale ama qaab kale oo lacag lagu bixin karaa ma jirto. Marka laga reebo adeegyada qofku u imanayo Safaaradda, sida samaynta Baasaboorka, Wakaalashada Hantida Maguurtada iwm oo iyaga lagu bixin karo xafiiska khasnadjiga oo keliya.
8. Qofka adeegga Negeeye isticmaalaya waxaa looga baahanyahay arimahan:
 - a. Qofka doonaya in uu isticmaalo adeeggan waa in uu leeyahay number telefoon oo Turkey ah, maadaama adeegga Negeeye uu gaar u yahay dadka deggan dalkan. Adeeggani Telefoon number kaas ayuu fariimaha ugu soo dirayaa qofka isticmaalaya. Adeeggan iskama diiwaan gelin karo qof aan lahayn lambar telefoon oo Turkey ah oo shaqaynaya.
 - b. Waxaa kale oo qofka looga baahanyahay in uu leeyahay email shaqaynaya, oo uu mar walba furan karo. Sababta oo ah emailkaa waxaa loogu soo dirayaa dhamaan fariimaha, xogaha iyo hadba heerka ay marayso adeeggii uu dalbaday.



Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ankara, Turkey

- c. Waxaa kale oo qofka laga rabaa, marka uu iska diiwaan gelinayo adeegga Negeeye in uu soo qorto cinwaanka gurigiisa ama xafiiskiisa oo sax ah, oo uu hubiyey. Sababta oo ah waa halka waraaqihiisa asalka ah “original” oo tasdiqsan loogu soo diri doono.
- d. Marka warqadahaaga cinwaanka gurigaaga lagu soo diro, waxaad heli doontaa fariin sheegaysa in warqadahaagii lagu soo diray cinwaankii aad soo qoratay. Waxaa kale oo fariinta la socda magaca shirkadda warqadahaaga lagu soo diray iyo lambarka xidhmada warqadahaaga (tracking number), oo aad Internetka kala socon kartid hadba meesha ay soo marayso iyo xaaladda ay ku sugantahay. Sidaa darteed Safaaraddu sinaba masuul ugama noqon doonto haddii aad address ama cinwaan khaldan soo qoratid. Sidoo kale adigaa ayaa masuul buuxa ka ah, in marka boostadu gurigaaga timaaddo, ee ay albaabka soo garaacdo, in aad ka guddoontid. Haddii ay dhacdo in aad ka guddoomi kari waydid, boostadu dib ayay ula soo noqonaysaa xidhmada boostadaada, adiga ayaana masuul ka noqon doona wixii ka yimaadda.
- e. Isticmaaluhu waa in uu ku soo diraa waraaqihiisa qaab sawir fiican, oo midab leh, tayo leh oo la akhriyi karo. Sidoo kalana sawirka warqadda ama baasaboorka aad soo diraysid waa in uu toosanyahay, oo uusan qalloocsanayn. Sababta oo ah sawirrada aad soo diraysid ayaa laguugu soo lifaaqayaa warqadahaaga.
- f. Waraaqaha aad ku soo diraysid adeegga Negeeye waxaa la ogolyahay oo keliya qaabka sawirka (image format) iyo PDF, lama ogola waraaqaha qaababka Ms Office ka ah sida Ms Word, Ms Excell ama qaab kale.



Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ankara, Turkey

9. Adeegga Negeeye wuxuu kuu qabanayaa shaqooyin door ah oo ay ka mid tahay:
 - a. Qabashada iyo hubinta waraaqaha iyo warbixinaha aad soo dirsatay.
 - b. Diyaarinta iyo daabacadda adeegyada aad soo dalbatay.
 - c. Tasdiiqa Wasaaradda Arimaha Dibadda ee Turkey.
 - d. Waxay Safaaraddu kuugu soo diraysaa adeegyadaada ama waraaqahaaga marka la dhammeeyo cinwaanka ama addresska aad soo qoratay.

10. Haddii dalabkaagu yahay nooca tooska “Online” lagu soo dalbado, marka uu dhinacaaga ka soo dhammaado, waxaa laguugu soo dirayaa jadwalkan:
 - a. Haddii aad khidmadda adeegyada aad dalbatay soo bixisid, rasiidhkana soo dirtid (**ka hor 15:00 galabnimo**). Warqadahaaga ama adeegyadaada waxaa lagu soo dirayaa maalinta ku xigta gelinka hore.
 - b. Haddii aad khidmadda adeegyada aad dalbatay soo bixisid, rasiidhkana soo dirtid (**ka dib 15:00 galabnimo**). Waxaa lagu soo dirayaa galabtaa maalinteeda labaad.
 - c. Sabti iyo Axad dalka Turkey lagama shaqeeyo, sidaa darteed waxba lama soo dirayo. Waxaa la mid ah maalmaha kale ee dalkani fasaxa yahay.

11. Adeegyada lagu soo dalbado sida tooska ah ama “Online” ka ah Safaaraddu qofna kama aqbali doonto in uu u yimaaddo safaaradda si loogu sameeyo. Waxaa keliya oo laga soo dalban karaa bogga adeegga Negeeye.



Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ankara, Turkey

12. Cinwaanka Adeegga Negeeye:

<https://ankaraemb.mfa.gov.so/Negeeye.aspx>

Caawiyaha: WhatsApp Number (Fariin keliya): +90 537 640 65 41

Cillad-bixiyaha: WhatsApp Number (Fariin keliya): +90 534 593 39 90

Email: adeegga.negeeye@gmail.com

13. Afeef:

Qormooyinka ku saabsan Adeegga Negeeye ee Safaaradda, sida *Xeerka Isticmaalka* ama *Su'aal iyo Jawaab* iyo kuwa kale, waxaa suurtagal ah in wax lagu soo kordhiyo, waxna laga beddelo. Sidaa awgeed, fadlan mar walba kala deg bogga Adeegga Negeeye qormooyinkii ugu dambeeyey.

<< Dhammaad >>